2026

# JAMHUURIYADA SOMALILAND
# GOLAHA WAKIILADDA JSL.

## GUDDIDA ARIMAHA GUDAHA, NABADGELYADA IYO DIFAACA EE GOLAHA WAKIILADDA JSL.

**WARBIXINTA.**

**KULAMADII SHAQO EE GUDDIDU LA YEELATAY MASUULIYIINTA QARANKA IYO WIXII KASOO BAXAY.**

## HORDHAC.

Mudane Gudoomiye iyo Mudaneyaal,

Guddida Arrimaha Gudaha iyo Nabadgalyadu iyadoo oo Gudanaya waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 55aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, sidoo kalena ku baraarugsan Shaqada baaxada leh ee guddida ay u qaabilsan tahay golaha wakiilada waxay kulamo shaqo la yeelatay Hay'addaha Dawladda ee kala duwan kuwaas oo ku salaysan kormeerka iyo la xisaabtanka waaxaha Dawladda, waxayna kala yihiin sidan:-

1. Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhiga JSL.
2. Koomishanka Doorashooyinka Qaranka JSL.
3. Agaasimaha Hay'adda Sirdoonka Qaranka JSL.
4. Taliyaha Ciidanka Booliska JSL.
5. Taliyaha Ciidanka Qaranka JSL.
6. Taliyaha Ciidanka Ilaalada Xeebaha JSL.
7. Wasiirka Wasaaradda Dawaladaha Hoose iyo H.Magaalooyinka JSL.

### KULANKA 1AAD EE GUDDIDA IYO WASIIRKA WAS. GAASHAANDHIGA JSL.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal,

Taarikhdu markii ay ahayd 09/06/2026 waxa Guddida Arimaha Gudaha, Nabadgelyada iyo Difaaca ee Golaha Wakiilada JSL ay kulan xog-waraysi ah la yeelatay Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhiga JSL, ujeedada kulankani uu daaranaa siday Guddidu xog-xogaal ugu noqon lahayd shaqada Wasaaraddu hormuudka u ahayd ee ku saabsan Mashruuci Qaramaynta Ciidamadii Madaniga, Mashruuca Dib- u habaynta Ciidamada Qaranka iyo Nidaamka Mushahar kordhinta Ciidanka Qaranka JSL.

Ugu horeyn, Wasiirku wuxuu sheegay Guddida in sharciyada Wasaaraddu u baahan yihiin wax-ka-beddel iyo dib-u-habayn si loola waafajiyo heerarka caalamiga ah, Waxa kale oo uu xusay in Taliska Ciidanka Qaranku sharci ahaan Wasaaradda hoos yimaaddo haddana dhaqan ahaan uu si toos ah ugu xidhan yahay Madaxweynaha, taasina ay wiiqayso awoodda Wasaaradda iyo in aanay jirin xeer-nidaamiye rasmi ah oo si buuxda u qeexaya maamulka iyo hawlaha Ciidanka Qaranka. Dhinaca kale, Wasiirku waxa uu ka warbixiyay in dhammaan ciidamada dalka la diiwaangeliyay, guulna kusoo dhamaadeen wajiyadii hore ee nidaamka diwaangalinta iyo dib- u habaynta ciidamada dalka isla markaana uu socdo qorshe sixitaan iyo dib-u-habayn muddo shan sano ah.

Sidoo kale, Wasiirku waxa uu Guddida uga warbixiyay marxaladda iskaashiga caalamiga ah, gaar ahaan xidhiidhka Wasaaradda Gaashaandhigga JSL la leedahay Wasaaradaha Gaashaandhigga Maraykanka iyo Britain. Wasiirku wuxuu tilmaamay in laamaha amniga dalku aanay weli si buuxda isugu xidhnayn, loona baahan yahay in la sameeyo hannaan ama xafiis isku-duwid ah oo mideeya iskaashiga iyo dalabyada amniga degdeg ah.

Dhinaca kale, Wasiirku waxa uu Guddidu usoo gudbiyay Caqabado ka jira dhanka Maxkamadaha Ciidamada JSL kun sheegay in kiisaska argagixisada ahaa loosoo wareejiyay Maxkamadaha ciidamada, hase yeeshee aanay jirin dhaqaale gaar ah oo loogu talagalay ilaalinta iyo gunnooyinka garsoorayaasha, taasina ay khatar ku tahay badbaadada garsoorayaasha iyo habsami-u-socodka caddaaladda.

## WAXYAABIHII GUDDIDA UGA SOO BAXAY KULANKII W.W. GAASHAANDHIGA.

1. Guddida waxa usoo baxay inay jirto qabyo nidaamka sharciga ah ee Wasaaradda gaashaandhiga iyo Taliska Guud ee Qaranka JSL oo ay ku wada shaqeeyaan.
2. Guddida Waxa usoo baxay in Awoodii Sharci iyo Maamul ee Wasaaradda Gaashaandhigu lahayd aanay u hogaansami jirin Masuuliyiintii ukala Dambeeyay Taliska Ciidanka Qaranka JSL, taas oo keentay in Wasaaradda Gaashaandhigu u ekaato mid aan gudan shaqadii ku waajibka ahayd.
3. Guddida waxa uu baxay in Maxkamada Ciidamada JSL aanay helin Mudnaantii dhaqaale iyo daryeel ee ay mudnaayeen, sababtoo ah waxa culays dhaqaale iyo amni keenay Dacwadaha Argagixisada ah oo u baahan feejignaan maamul iyo cadaaladeed oo dheeraad ah isla markaana aanay jirin in Miisaaniyadii Dacwadahaasi aan lagu soo wareejin Wasaaradda Gaashaandhiga.

## KULANKA 2AAD EE GUDDIDA IYO KOOMISHANKA DOORASHOOYINKA.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal,

Taarikhdu markii ay ahayd 17/06/2026 waxa Guddida Arimaha Gudaha, Nabadgelyada iyo Difaaca ee Golaha Wakiilada JSL ay kulan xog-waraysi ah la yeelatay Koomishanka Doorashooyinka Qaranka JSL, ujeedada kulankani uu daaranaa siday Guddidu xog-xogaal Waajibaadka qaran ee ay Koomishanku u igman yihiin.

Ugu horeyn, Komishanku waxa uu Guddida u sheegay in dadaallo iyo kulamo dheer kadib ay soo afjareen kala duwanaanshihii Xisbiyada Qaranka ee ku salaysnaa Habka Diwaangalinta codbixiyayaasha JSL, Sidoo kale Koomishanku waxa ay cadeeyeen in ay Madaxweynaha kala qaateen qorshaha doorashooyinka soo socda, isla markaana diyaariyeen Qorshe shaqo oo Soconaya ilaa sannadka 2028.

Dhinaca kale, Koomishanku waxay Guddidu u cadeeyeen in ay qaateen Nidaam cusub oo diiwaangelin ah, hase yeeshee weli ay socdaan wada-hadallo ku saabsan qaabka uu nidaamkaasi noqonayo, go'aamo kama dambays ahna aan laga gaadhin. Komishanku wuxuu caddeeyay in qorshaha cusub laga faa'iidaysanayo casharradii laga bartay diwaangalinta iyo doorashooyinkii hore, iyadoo la doonayo in daneeyayaasha kala duwan ay ka qayb qaataan talo-bixinta iyo diyaarinta nidaamka diiwaangelinta.

Sidoo kale, Komishanku wuxuu Guddida u sheegay in caqabadaha ka jira nidaamka diiwaangelinta muwaadiniinta, gaar ahaan dadka goobaha laga raro iyo dhibaatooyinka ka dhasha helitaanka kaadhadhka, ay yihiin arrimo culus oo u baahan xal waara. Waxay gudidda la wadaageen in caqabadahaasi ay leeyihiin dhinacyo sharci, dhaqaale, farsamo iyo siyaasadeed, isla markaana Komishanku ku hawlan yahay sidii loo fududayn lahaa adeegyada muwaadiniinta ee dhinaca doorashooyinka. Dhinaca kale, Komishanku wuxuu Guddida la wadaagay in xaaladda Degmooyinka maqan ee Gobolka sool ay arinteedu tahay mid heer qaran ah oo u baahan wada-tashi, isla markaana xogta deegaannada maqan la hayo.

## WAXYAABIHII GUDDIDA UGA SOO BAXAY KULANKA KOOMISHANKA DOORASHOOYINKA QARANKA.

1. Guddidu waxay ku hambalyaynaysaa Koomishanka Doorashooyinka Qaranka inay Xaliyeen kala duwanaanshihii Xisbiyada Qaranka ee ku salaysnaa nidaamka diwaangalinta Codbixiyayaasha.
2. Guddida waxa usoo baxay in nidaamka cusub ee diwaangalinta cod-bixiyayaashu aanu farsamo, dhaqaale iyo sharci ahaanba ka dhamaystirnayn dhanka Koomishanka doorashooyinka qaranka.
3. Guddida waxa usoo baxay in koomishanka doorashooyinka qaranku aanay wali gacantooda soo galin dhaqaalihii loogu talo galay diwaangalinta codbixiyayaasha iyo qabashada doorashooyinka mudaysan, taasina ay caqabad ku tahay hawl malmeedka shaqo ee koomishanka.
4. Guddida waxa u soo baxay in baahi wayn loo qabo Dhamaystirka Xeerka Aasaaska Koomishanka Doorashooyinka Qaranka kaas oo xal u ah

Caqabadaha shaqo iyo Madaxbanaani la'aanta ay la kulmaan Koomishanku wakhtiyada Xasaasiga ah ee Doorashooyinka.

**KULANKA 3AAD EE GUDDIDA IYO AGAASIMAHA HAY'ADDA SIRDOONKA QARANKA.**

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal,

Taarikhdu markii ay ahayd 17/06/2026 waxa Guddida Arimaha Gudaha, Nabadgelyada iyo Difaaca ee Golaha Wakiilada JSL ay kulan xog-waraysi ah la yeelatay Agaasimaha Hay'adda Sirdoonka Qaranka JSL, ujeedada kulankani uu daaranaa siday Guddidu xog-xogaal uga noqon lahayd xaaladda amniga qaranka, khataraha amni ee la filan karo iyo Waajibaadka Amniga Qaran ee ay u igman tahay Hay'addaasi.

Agaasimaha Hay'addu, waxa uu Guddida uga warbixiyay xaaladda guud ee amniga qaranka iyo in Hay'addu tahay indhaha iyo dhagaha qaranka, isla markaana ay jiraan khataro caalami ah oo ay ka mid yihiin ururrada argagixisada ee abaabulan iyo khataraha siyaasadeed ee ka iman kara waddamada ay hay'addu u aragto inay cadaw ku yihiin Jamhuuriyada Somaliland. Agaasimuhu, Waxaa uu Guddida la wadaagay in khatarahaas oo isbiirsaday ay saamayn ku yeesheen dhacdooyinkii ka dhacay Gobolka Awdal iyo Deeganada Xeebaha Awdal ku teedsan, iyadoo Hay'addu sheegtay in Soomaaliya oo garab ka helaysa wadamo kale ay ku foogan tahay hawlahaas.

Dhanka kale Agaasimaha hay'addu, waxa uu Guddida uga warbixiyay inay jiraan arrimo hoos u dhigay wax-qabadka Hay'adda, kuwaas oo wax-ka-qabadkooda iyo dib-u-habayntooda la bilaabay intii ay masuuliyiintu xafiiska joogeen imikana meel fiican ay u marayso. Sidoo kale waxa uu Guddida la wadaagay in wax-ka-beddelka iyo kaabista Xeerka Hay'adda sirdoonka Qaranka JSL ay shaqadiisu socoto imikana uu horyaalo Xafiiska Madaxweynaha una soo gudbi doona Golaha wakiilada JSL. Waxa kale oo uu Agaasimuhu Guddida ka codsaday inay baahi wayn u qabaan xeerar muhiim u ah shaqada Hay'adda Sirdoonka iyo guud ahaan amniga qarankaba kuwaas oo uu hormuud u yahay Xeerka La-dagaallanka Argagixisada oo ay Guddidu shaqadiisa waddo dhawaana dhamaystiri doonto.

**WAXYAABAHA GUDDIDA UGA SOO BAXAY KULANKA HAY'ADDA SIRDOONKA QARANKA.**

1. Guddidu waxay ku Bogaadinaysa Hogaanka Hay'adda Sirdoonka Qaranka shaqada ay u igman yihiin iyo sida muuqata ee ay Hay'addii ugu soo dabaaleen dariiqa saxda ah ee ay qaranka ugu igman tahay.
2. Guddidu waxay ku dhiirigalisay Agaasimaha Hay'adda Sirdoonka Qaranka isbadalada ka muuqda Hay'adda, dhinaca kale waxay Guddidu Hogaanka Hay'adda uga digtay in aanay ku dhex milmin Arimaha Siyaasadda Gudaha si ay u dhisanto kalsoonida Hay'adda ee Bulshada dhexdeeda ah.
3. Guddida waxa usoo baxay in Hay'adda Sirdoonka Qaranka ay hooseyso Qoondada Sanad-Miisaaniyadeedka ay ku hawlgasho, taasina ay keeni karto in uu gaabis ku yimaado shaqooyinka qaar oo u baahan taageero dhaqaale iyo farsamo.
4. Guddida waxa usoo baxay in Hay'addu u baahan tahay in lagu sameeyo dib u habayn nidaam, dhaqaale, tababar iyo mid tignoolajiyadeed si ay ula jaanqaado marxaladaha iyo isbadalada ka socda geeska afrika iyo dunida kaleba.

## KULANKA 4AAD EE GUDDIDA IYO TALIYAHA CIIDANKA QARANKA JSL.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal,

Taarikhdu markii ay ahayd 04/08/2026 waxa Guddida Arimaha Gudaha, Nabadgelyada iyo Difaaca ee Golaha Wakiilada JSL ay kulan kormeer shaqo iyo xog-waraysi ah Taliska Miiska Saraakiisha Ciidanka kulan kula yeelatay Taliyaha Ciidanka Qaranka JSL, ujeedada kulankani uu daaranaa siday Guddidu xog-xogaal uga noqon lahayd xaaladda guud ee Ciidanka, dib-u-habaynta iyo diiwaangelinta, mushahar kordhinta iyo caqabadaha haysta Ciidanka.

Ugu Horeyn, Taliyuhu wuxuu Guddida la wadaagay in xaaladda guud ee Ciidanka Qaranku tahay mid nabad ah, inkasta oo ay jiraan xasarado ka taagan Gobolka Awdal, gaar ahaan deegaannada ku teedsan Xeebaha Saylac iyo Lughaya, oo uu tilmaamay inay ka socdaan abaabulo qabiilaysan oo hurinaya coladaha bulshada kuwaas oo gacmo shisheeye ku jiraan. Sidoo kale Taliyuhu wuxuu Guddida la wadaagay in uu Ciidanka ku sugan jiidaha ay Xasaraduhu ka jiraan ay amar ku qabaan inuu ka hortago cid kasta oo wada abaabul hubaysan, isla markaana lala wareego hubka iyo gaadiidka loo adeegsado falalkaas ee lagu khalkhal galinayo nabada iyo xasiloonada deegaanka maxaabiista lagu qabtana lagu wareejinayo hay'adaha amniga gudaha ee ay khusayso.

Dhinaca dib-u-habaynta iyo diiwaangelinta, Taliyaha Ciidanku wuxuu sheegay in nidaamka casriga ah ee diiwaangelinta biometric-ga lagu guulaystay, isla markaana la dhamaystiray diiwaangelinta dhammaan Ciidamada JSL, iyadoo hadda lagu jiro kala-hufid iyo dib-u-qiimayn. Nidaamkani wuxuu suurtageliyay in la ogaado tirada ciidamada qaranka, kuwa hawlgeli kara, goobaha ay ku sugan yihiin iyo qaybaha kala duwan ee ay ka hawlgalaan. Sidoo kale, Taliyaha Ciidanka Qaranku wuxuu Guddida uga warbixiyay Nidaamka mushahar kordhinta Ciidamada, isagoo sheegay in ay tahay ballan-qaad uu Madaxweynaha JSL sameeyay, kaas oo ku salaysan kordhin sannadle ah oo dhan 50%, iyadoo muddada xilka lagu gaadhayo 250%. Taas oo keentay in mushahar kordhintu kor u qaadday niyadda iyo rabitaanka ciidamada, inkasta oo ay jiraan caqabado dhaqaale oo Caalami ah kuwaas oo keeni kara saamayn dhaqaalaha gudaha ah.

Dhanka kale, Caqabadda ugu weyn ee Ciidanka haysata ayaa ah dhinaca dhaqaalaha, gaar ahaan miisaaniyadda qaranka oo aan si ku filan u daboolin baahiyaha Ciidanka, iyadoo Taliyaha Ciidanku uga warbixiyay Caqabada miisaaniyadeed ee dhanka caafimaadka Ciidanka oo aan ku filnayn daryeelka dhaawacyada iyo baahiyaha caafimaad ee ciidanka.

Ugu dambayn, Taliyaha Ciidanku wuxuu Guddida oo gole-waynaha ka wakil ah ka codsaday in Ciidanka Qaranka la siiyo mudnaanta koowaad ee baahiyaha qaranka, si loo helo ciidan isku filan aqoon ahaan, hub iyo agab ahaanba. Waxa kale oo uu sheegay in dhawaan heshiis caafimaad ay la galeen Cisbitaalka Ciidamada ee Itoobiya, kaas oo qayb ka qaatay fududaynta baahiyaha caafimaad ee Ciidanka, inkasta oo miisaaniyadda caafimaad ee hadda jirtaa aanay si buuxda u dabooli karin baahiyahaas.

## WAXYAABAHA GUDDIDA UGA SOO BAXAY KULANKA TALIYAHA CQ JSL.

1. Guddida waxay hambalyo iyo dhiirigalin u diraysaa Dhamaan Ciidanka Qaranka JSL ee ku foogan ilaalinta Jiritaanka iyo nabada Qaranka JSL.
2. Guddida waxay usoo baxay, in horumar laga sameeyay nidaamka dib u habaynta, qiimaynta iyo tirakoobka Ciidanka Qaranka JSL, taas oo keentay in Hogaanka Ciidanka Qaranka iyo Hay'addaha Amnigaba ay si fudud isu waydaarsan karaan Xogaha iyo sugnaanshaha tirada ciidamada Qaranka inta hawlgal ku jirta, inta caafimaad iyo dhaawac ku maqan iyo dhamaan hawlgalooda gaarka ah, taas oo keenaysa isku xidhnaan casri ah oo dhexmarta xafiisyada shaqo wadaaga amni ah.
3. Guddida waxa usoo baxay, In miisaaniyada dhanka caafimaadka Ciidanku aad u yartahay taasoo keeni karta in culays ku yimaado Ciidamada soo

dhawacma, si looga feejignaado in Ciidanka Xaalad dayacnaan ahi ay ku timaado.

4. Guddida waxa usoo baxay, In Miisaaniyada Ciidanka Qaranku ay tahay mid aan buuxin karin Baahiyaha rasmiga ah ee Ciidanka Qaranka, una baahan yihiin in mudnaanta 1aad la siiyo ciidanka si ay u gutaan waajibaadka qaran ulana jaanqaadi karaan Xaaadaha iyo isbadalada casriga ah ee dhanka hubka iyo gaadiidka ciidamada.

## KULANKA 5AAD EE GUDDIDA IYO TALIYAHA CIIDANKA BOOLISKA JSL.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal,

Taarikhdu markii ay ahayd 05/08/2026 waxa Guddida Arimaha Gudaha, Nabadgelyada iyo Difaaca ee Golaha Wakiilada JSL ay kulan kormeer shaqo iyo xog-waraysi ah Xarunta Taliska Ciidanka Booliska kulan kula yeelatay Taliyaha Ciidanka Booliska JSL, ujeedada kulankani uu daaranaa siday Guddidu xog-xogaal uga noqon lahayd xaaladda guud ee Ciidanka Booliska, Amniga Gudaha Dalka, Nidaamka dib-u-habaynta iyo diiwaangelinta, mushahar kordhinta iyo caqabadaha haysta Ciidanka Booliska JSL.

Ugu horeyn, Taliyaha Ciidanka Boolisku waxa uu Guddida uga warbixiyay Amniga gudaha dalka isagoo sheegay in dhammaan gobollada iyo degmooyinka dalku nabadgelyo yihiin, hase yeeshee Gobolka Sanaag ay ka dhaceen laba khilaaf oo qabiileed, mid ka mid ahna aanu weli xal rasmi ah helin, iyadoo dhinacyadu isku hubaysanayaan. Waxa kale oo Taliyuhu xusay in buuralayda dahabka ee Sanaag yihiin goob xasaasi ah, isla markaana uu jiro amar Madaxweyne oo ku saabsan diyaarinta qorshe lagu maamulayo deegaankaas, balse wali lagu jiro samaynta qorshe guud oo lagu nidaamiyo qodista dahabka. Sidoo kale, Taliyuhu waxa uu tilmaantay walaac laga qabo isku dayo ay Al-Shabaab ku doonayso inay ku gaadho goobaha macdanta laga qoto, goobtaas oo ay ku sugan yihiin dad ajaanib ah oo Sharci darro dalka ku jogaa dad muwaadiniin ah u shaqeeya.

Taliyuhu wuxuu Guddida la wadaagay in Ciidanka Booliska loo diyaariyay qorshe shan sano ah oo dib-u-habayn iyo tayayn ah, iyadoo lala shaqaynayo Ciidamada kale ee qaranka sida militariga si loo xoojiyo anshaxa iyo nidaamka ciidanka, lana bixiyo tababaro ku saabsan dambiyada iyo anshaxa shaqada. Taliyuhu wuxuu sheegay in ay wadaan dadaalo Dhinaca haweenka booliska ah, waxa socda baadhitaan ku saabsan sidii haweenku u qaban lahaayeen xilalka Taliyeyaasha Saldhigyada, inkasta oo caqabado shaqo iyo amni ay ku xeeran yihiin.

Dhanka kale, Taliyaha waxay Guddidu wax ka waydiisay nidaamka Sharci iyo shaqo Ee Xarunta Dambi-baadhista CID oo ka tirsan Ciidanka Booliska JSL, isla markaana qaabilsan baadhista dambiyada culus iyo hubinta raadadka shakiga leh. Taliyuhu waxa uu Guddida u cadeeyay in awoodda booliska xadhigga muwaadinku tahay 24 saacadood, wixii intaa ka dambeeyana ay u baahan tahay go'aan maxkamadeed, iyadoo la raacayo amarada garsoorka.

Ugu dambayn, taliyuhu waxa uu Guddida la wadaagay caqabadaha waaweyn ee Ciidanka Booliska haysta waxana ka mid ah shilalka gaadiidka oo inta badan ka dhaca Hargeysa, xakamaynta mudaharaadyada, saamaynta baraha bulshada, doorka madax-dhaqameedka, miisaaniyad aan ku filnayn gaadiidka, hubka iyo qalabka iyo cidhiidhiga jeelasha oo keenaya in maxaabiista xukunsanayaasha ahi weli ku jiraan saldhigyada. Iyadoo taliyuhu sheegay in kahortaga mudaharaadada in ciidamo gaar ah loo tababaray hawshaas lana qorsheynayo in awooddaas lagu gaadhsiiyo dhammaan gobollada dalka, balse ay jiraan caqabado dhinaca qalabka ah oo miisaaniyadu sababtay.

## WAXYAABAHA GUDDIDA UGA SOO BAXAY KULANKA TALIYAHA CB JSL.

1. Guddida waxa usoo baxay, In nidaamka Ciidanka booliska ay u maraan Xadhiga muwaadiniinta ay inta badan Sharciga baalmarsan tahay, sababtoo ah muwaadiniin loogu yeedhay in waraysi lala yeesho ayaa xoriyad ka qaadis kala kulma ciidanka booliska.
2. Guddida waxa usoo baxay, in Ciidanka Boolisku ay wajahayaan culayso kaga imanaya Xaalada maxaabiista xukuman ee saldhigayada buux dhaafiyay, taaas oo keenaysa in xuquuqo ay ku waayaan maxaabiista xukunsaneyaasha ah.
3. Guddida waxa usoo baxay, in Ciidanka Boolisku aanu bulshada la wadaagin si habsami ah warka hore ee dhacdooyinka maalinlaha ah iyo natiijooyinka kasoo baxaba.
4. Guddida waxa usoo baxay, In Shilalka ugu badani ay ka dhacaan Caasimada Hargaisa iyo nawaaxigeeda taas oo sababteedu tahay Cidhiidhiga gaadiidka iyo raacitaan la'aanta shuruucda wadista gaadiidka.
5. Guddida waxa usoo baxay, in madax-dhaqameedku ay dayaceen doorkoodii ku salaysnaa ilaalinta nabada iyo dhaqanka bulshada, taas oo garab muhiim ah u ahayd hay'addaha amniga gudaha dalka.
6. Guddida waxa usoo baxay, In saamaynta Baraha bulshadu sababtay inay bataan dambiyada ku lidka ah dhaqanka, diinta iyo anshaxa suuban ee bulshada JSL.
7. Guddida waxa usoo baxay, In Wasaaradda Cadaaladda iyo Ciidanka Asluubtu ay gabeen doorkoodii diyaarinta Xabsiyo lagu hayo Maxaabiista

Xukuman ee buuxdhaafiyay saldhigyada Ciidanka booliska, madaama Xukunsanuhu uu dhamaystay doorkii ciidanka Booliska ee ahaa baadhista iyo horgeynta maxkamadaha.

8. Guddida waxa usoo baxay, In koomishanka Xuquuqul Aadanaha Qaranka iyo Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka ay tahli kari waayeen waajibaadkooda ku salaysan Kormeerka Saldhigyada Ciidanka Booliska si uu ogaadaan Maxaabiista Xukunsaneyaasha ah ee mudo dhaafka ku ah saldhigyada Ciidanka booliska.
9. Guddida waxa usoo baxay, In Ciidanka Boolisku aysan Haysan miisaaniyad ku filan inay ku iibsadaan Qalabka, Hubka iyo Gaadiidka ay ku gudanayaan Waajibaadka Qaran.
10. Guddida waxa usoo baxay, In Ciidanka Boolisku aanay haysan diyaar-garaw ku filan, Qalab iyo Ciidan tababaran oo ay kaga hortagaan rabshadaha mudaharaadada, taasina ay keento dhimasho iyo dhaawacyo ku yimaada muwaadiniinta.

## KULANKA 6AAD EE GUDDIDA IYO WASIIRKA WASAARADDA DAWLADAHA HOOSE IYO HORUMARINTA MAGAALOOYINKA JSL.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal,

Taarikhdu markii ay ahayd 14/09/2026 waxa Guddida Arimaha Gudaha, Nabadgelyada iyo Difaaca ee Golaha Wakiilada JSL ay kulan xog-waraysi ah la yeelatay Wasiirka Wasaaradda Dawladdaha hoose iyo Horumarinta Magaalooyinka JSL, ujeedada kulankani uu daaranaa siday Guddidu xog-xogaal ugu noqon lahayd shaqada Wasaaraddu hormuudka u tahay ee Degmooyinka Dalka.

Ugu Horeyn, Wasiirku waxa uu Guddida uga warbixiyay Shaqada Wasaarada, qaab-dhismeedkeeda, waajibaadkeeda sharci iyo xaaladda maamulka degmooyinka dalka. Wasiirku wuxuu sheegay in kala-qaybintii Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Wasaaradda Dawladaha Hoose ay saamayn ku yeelatay hawlihii iyo isku-duwidda shaqada, iyadoo uu tilmaamay in Qodobka 30aad ee Xeerka 71/2025 uu qeexayo waajibaadka Wasaaradda, halka Wasaaraddu sidoo kale ka hawlgasho arrimaha la xidhiidha Xeerka Dhulka No. 17/2003. Sidoo kale Wasiirku Waxa uu Guddida la wadaagay in bilowgii Wasaaraddu ay la kulantay culaysyo dhinaca sharci iyo maamul ah, hase yeeshee ay dib-u-habayn ku samaysay nidaamka degmooyinka, iyadoo dalka ay ka jiraan 101 degmo, oo

ay ka mid yihiin 23 degmo doorasho iyo 78 degmo oo darajooyin kale leh, halka 17 degmo oo kaliya ay ka isticmaalaan nidaamka maaliyadeed ee IFMIS.

Wasiirku waxa uu sheegay in Wasaaraddu ay samaysay xog-ururin ku saabsan adeegyada bulshada iyo xaaladda dawladnimo ee degmo kasta oo dalka ah, iyadoo xogta dib loo xaqiijiyay, waraaqo rasmi ah laga saxeexay degmooyinka, lana sameeyay bogag u gaar ah degmo kasta iyo xogteeda. Sida uu Wasiirku sheegay, arrintaasi waxay suuragelisay in Wasaaradda laga helo xogta dhamaan degmooyinka dalka oo dhan.

Dhinaca kale, Wasaiirku waxa uu Guddida la wadaagay caqabadaha maaliyadeed iyo maamul ee ka jira degmooyinka, iyadoo la sheegay in 45 degmo oo keliya ay leeyihiin miisaaniyado rasmi ah, halka degmooyinka kale ay inta badan ku tiirsanaaayeen wixii dhaqaale ah ee soo gaadha. Wasiirku wuxuu xusay in khilaafkii iyo kala-qaybsanaantii labada Wasaaradood ay keeneen dib-u-dhac iyo khasaaro dhinaca shaqada ah, balse uu hadda khilaafkaasi soo dhammaaday. Waxa kale oo uu ka hadlay nidaamka daymaha degmooyinka, isagoo sheegay in Xeer 23/2019 uu si kooban uga hadlayo daynta ay qaadan karaan Degmooyinku sida xaaladaha masiibooyinka, isla markaana ay joojiyeen daymihii aan nidaamsanayn ee degmooyinku bangiyada ka qaadan jireen, lana dejiyay hannaan waafaqsan shuruucda dalka.

Wasiirku waxa uu Guddida u cadeeyay in ay degmooyinka ku amartay inay soo gudbiyaan dhammaan shahaadooyinka ay bixiyaan, iyadoo ujeeddadu tahay in la mideeyo oo la jaangooyo shahaadooyinka ay degmooyinku bixiyaan. Ugu dambayn, Wasiirku waxa uu xusay in Xeerka Maamulka Maaliyadda No. 75/2016 uu qaybta maaliyadeed ee degmooyinka hoos geeyay Wasaaradda Maaliyadda, taas oo saamayn ku leh maamulka iyo isku-duwidda maaliyadda dawladaha hoose ee dalka.

## WAXYAABIHII GUDDIDA UGA SOO BAXAY KULANKA WASIIRKA D. HOOSE & H. MAGAALOOYINKA JSL.

1. Guddida waxa usoo baxay, in arimaha Sharci ee xeer lr 23/2019 iyo xeer lr 71/2025, ay u baahan yihiin is-waafajin, madaama xeerka degmooyinka lagu dhaqaa uu yahay xeer lr 23/2019 kaas oo intii Wasaaradda la sameeyay aan lagu samaynin wax-kabada iyo kaabis, kuwaaso marmarka qaarna abuura khilaafad Sharci.
2. Guddida waxa usoo baxay, in Wasaaradda Dawladaha hoose iyo Horumarinta Magaalooyinka ay ku xad-gudubtay Xeer 23/2019, sababtoo ah ma jirto

Awood iyo waajibaad ay leedahay oo ay ku furi karto kuna xidhi karto kal-fadhiyada Goleyaasha deegaanka dalka.

3. Guddida waxa usoo baxay, in Wasaaradda Dawladaha hoose aanay wax talo iyo miisaan ah ku lahayn Miisaaniyada Degmooyinka la siiyo, sidoo kalena kabka 12.5% inta uu Miisaaniyada Guud ee Qaranka ka noqdo aan lala wadaagin Wasaaradda, lana siinin xog iyo macluumad ku filan ay ku dabagasho degmooyinka dalka.
4. Guddida waxa usoo baxay, inay jirto lacag uu Xafiiska Xisaabiyaha guud ka goosto kabka Dawladaha hoose 5%, taas oo aan sharciyad ku dhisnayn balse ahaa curfi la caadaystay oo sharciga baalmarsan.
5. Guddida waxa usoo baxay, In degmooyinka dalku aanay xuquuq siman ku lahayn miisaaniyada qaranka, taas oo keentay sadbursi iyo kala koritaan ku yimid deegaanada Jamhuuriyada Somaliland.
6. Guddida waxa usoo baxay, in sababta khilaafaadka dawladaha hoose usoo noqnoqdaa ay tahay awood maroorsi, ku tagri-fal awoodeed, dano shakhsiyadeed iyo mid siyaasadeed uu ku kaco masuulka u sareeya ee degmadaas.
7. Guddidu waxa usoo baxay, In Kabkii 2% ee Gobolka sool ay xukuumaddu u wareejisay Arimaha Ciidamada iyo Hawlgalada degdega ah.

## SOO JEEDINTA & BAAQA GUDDIDA.

1. Guddidu waxay ugu baaqaysa Bulshada degaanada Awdal iyo Salal inay u dhago-nuglaadaan dhawaaqyada nabadeed ee Xukuumada iyo Bulshada JSL uga imanaya, Isla markaana ka shaqeeyaan Xasiloonada iyo nabad kuwada noolaanshaha. Guddidu waxay usoo jeedinaysaa Xukuumada inay balaadhiso gogosha Nabadeed ee Gobolada Galbeed si ay uga qayb-qaataan Dhamaan Dhinacyada kala duwan ee Qaranka sida Goleyaasha Barlamaanka, Madax-dhaqameedka, Acyaanta Bulshada JSL iyo Cidkasta oo ku suntan ka shaqaynta Arimaha Nabada.

2. Guddidu waxay ugu baaqaysaa Dhamaan Madax-dhaqameedka Jamhuuriyada Somaliland inay qaataan Doorkooda ku aadan nabadaynta iyo midnimada Bulshada JSL.

3. Guddidu waxay ku bogaadinaysaa Ciidamada Qaranka Jamhuuriyada Somaliland dadaalka naf-hurnimada leh ee ay ku sugaan Xasiloonida, Nabada iyo Midnimada Umadda JSL.

4. Guddidu waxay ku baaqaysaa in la xoojiyo wada-shaqeynta Sharciga ku salaysan ee Wasaaradda Gaashaandhigga iyo Taliska Ciidanka Qaranka, si loo yeesho nidaam maamulka iyo hawlaha Ciidanka oo si buuxda u cad.

5. Guddidu waxay soo jeedinaysaa in si degdeg ah loo diyaariyo oo loo ansixiyo xeer-nidaamiye caddeynaya awoodda maamul ee Wasaaradda iyo heerarka mas'uuliyadda taliska, si Wasaaraddu u noqoto mid buuxisa waajibaadkeeda Dastuuriga.

6. Guddidu waxay dalbanaysaa in loo sameeyo Maxkamadaha Ciidamada JSL miisaaniyad gaar ah oo lagu daryeelo garsoorayaasha (gunnooyin iyo ilaalin), isla markaana la xaqiijiyo in dhaqaalaha dacwadaha argagixisada si nidaamsan loogu wareejiyo Wasaaradda Gaashaandhiga JSL.

7. Guddidu waxay soo dhawaynaysaa in Koomishanka Doorashooyinka Qaranku ay qaateen nidaamka cusub ee diwaangalinta kuna guuleysteen inay so afjaraan kala duwanaanshihii xisbiyada qaranka, Guddidu waxay Xukuumadda ugu baaqaaysa in si degdeg ah loogu fasaxo dhaqaalaha loo qoondeeyay diiwaangelinta cod-bixiyayaasha, si loo dhamaystiro farsadamada diwaangalinta cusub loogana hortago khaladaadkii laga bartay diwaangalintii hore, sidoo kalena la dejiyo qorshe xal waara oo lagu yareynayo caqabadaha diiwaangelinta (kaadhadhka, dadka goobaha laga rabo, arrimaha farsamo, sharci, iyo siyaasadeed) iyadoo la samaynayo hab adeeg oo muwaadiniinta u fudud.

8. Gudidu waxay Gole-waynaha usoo jeedineysaa in Goluhu qaato doorkiisa sharciyeed ee Wax-kabadal iyo kaabis sharci ah nidaamka diiwaangalinta cusub ee komishanku qaatey, si looga ilaaliyo khaladaadka kasoo baxay diiwaangalintii hore.

9. Gudidu waxay usoo jeedineysaa Ciidanka boolisku in ay dhowraan ilaalinta ku dhaqanka sharciga isla markaasna ay ka taxadaraan xadhiga aan sharciga waafaqsaneyn ee muwaadiniinta, kaas oo dhaawacaya xoriyadaadka dastuuriga ah ee muwaadiniinta, sumcad xumana ku ah nidaamka dimuquradiyada isla markaasna aanay faragalin awoodaha hay'addaha garsoorka JSL. Sidoo kale si degdeg ah bulshada loola wadaago dhacdooyinka maalinlaha ah si aan shacabka loo marin-habaabin, taas oo keeni karta isku xidhnaasho Ciidanka iyo Bulshada JSL.

10. Guddidu waxay ku baaqaysaa in Ciidanka Booliska ay helaan qalab, gaadiid iyo tababarro ku filan oo lagaga hortago rabshadaha mudaharaadyada, si loo yareeyo shilalka, dhimashada iyo dhaawacyada muwaadiniinta.

11. Guddidu waxay ugu baaqaysaa Wasaaradda Cadaaladda JSL iyo Ciidanka Asluubta inay gutaan doorkooda la wareegida maxaabiista xukunsaneyaasha ah ee buuxdhaafiyay saldhigyada Ciidanka Booliska JSL, si ay maxaabiistaasi u hesho xuquuqda ay mudan yihiin.

12. Guddidu waxay ugu baaqaysaa Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud Ee Qaranka iyo Koomishanka Xuquuqul Aadanaha Qaranka in ay dardargaliyaan doorkooda kormeerka Saldhigayada Ciidanka Booliska JSL si xal loogu helo maxaabiista mudo dhaafka ah iyo Xukunsaneyaasha lagu ilaabay saldhigayada Ciidanka Booliska.

13. Guddidu waxay soo jeedinaysaa in Hay'adda Sirdoonka Qaranka lagu xoojiyo nidaamkeeda dhinacyada tababarka, tignoolajiyada, iyo dib-u-habaynta qoondada sanad-miisaaniyadeedka, si loo yareeyo gaabiska ka dhasha miisaaniyad yaraanta.

14. Guddida waxay jeedinaysaa in Hay'adda Sirdoonka Qaranku Ka taxadarto ku milanka siyaasada si loo dhawro sumcadda hay'adda, madaama ay tahay hal-bawlihii qaranka kuna foogan culaysyada amniga ee Qaranka kusoo wajahan.

15. Guddidu waxay usoo jeedinaysaa Xukuumada JSL in Ciidanka Qaranka la siiyo mudnaanta koowaad ee baahiyaha qaranka, si ay u helaan miisaaniyad ku filan saanadooda military, isla markaana mudnaan gaara lasiiyo arimaha caafimaadkooda si looga taxadaro baahida caafimaad ee ku timaada ciidamada marka xaalad dagaal lasoo daristo.

16. Guddidu waxay Gole-waynaha usoo jeedinaysaa inay mudnaanta 1aad siiyaan Ciidanka Qaranka JSL iyo Hay'adda Sirdoonka Qaranka marka ay miisaaniyaddu hortimaado Golaha Wakiilada, si ciidamadu u noqdaan kuwo ka dhisan dhanka caafimaadka, agabka, saanadda iyo Baahiyaha gaarka ah ee ciidamada soo wajaha, isla markaana ay ula jaanqaado xasaradaha iyo isbadalada ka socda Geeska afrika.

17. Guddidu waxay ugu baaqaysaa Wasaaradda Horumarinta Maaliyada iyo Dhaqaalaha in ay kabka dawladda dhexe si siman u gaadhsiiso qoondada miisaaniyadeed ee degmo kasta oo dalka kamid ah, isla markaana si degdeg ah u joojiso lacagaha aan sharciga waafaqsanayn ee Xisaabiyaha Guud ee Qaranku ka jaro kabka Dawladaha hoose ee dalka.

**XAFIISKA GUDDIDA ARIMAHA GUDAHA, NABADGELYADA IYO DIFAACA EE GOLAHA WAKIILADDA JSL.**